XAFIISKA
HANTIDHOWRKA GUUD
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



TODOBAADKA XORIYADDA

# DULMARKA
# WARBIXINTA SANNADLAHA EE BAARISTA U-HOGGAANSANAANTA SHARCIGA

30 June 2026

# EREYADA LA SOO GAABIYEY

| | |
|---|---|
| **AB** | Adeeg Bixiye |
| **AFROSAI** | Ururka Hay'adaha Hantidhowrka ee Afrika |
| **AFROSAI-E** | Ururka Hay'adaha Hantidhowrka ee Afrika ee Ingiriiska ku Hadla |
| **HG** | Hantidhowraha Guud |
| **BUSH** | Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga |
| **DFS** | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| **ISSAIs** | Heerarka Caalamiga ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare |
| **JFS** | Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya |
| **XHG** | Xafiiska Hantidhowrka Guud |
| **MDAs** | Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha |
| **TSA** | Khasnadda Dhexe ee Dowladda |
| **AOAP** | Qorshe-sanadeedka Guud ee Baarista |
| **GD** | Gaadiidka Dowladda |
| **SM** | Sannad Maaliyadeed |
| **XHCS** | Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed |
| **IMCC** | Guddiga Isku Dhafka Wasaaradeed ee Qandaraasyada dheef-wadaagga |
| **TGP** | Mashruuca Horumarinta Maamulka iyo Dowlad-wanaagga |
| **SRSP** | Barnaamijka Taageerada Dhismaha Dawladda iyo Dib-u-heshiisiinta |

**Han. Lam#:** XHG/HG467/2026 **Taariikh:** 30/06/2026

Guddoonka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya,
Muqdisho, Soomaaliya

**Mudaneyaal & Marwooyin,**

Xafiiska Hantidhowrka Guud oo gudanaya waajibkiisa ku xusan Qodobada **6aad** iyo **11aad** ee Sharciyada Hantidhowrka Guud iyo Maareynta Maaliyadda Guud, waxa sharaf ii ah in aan idiin soo gudbiyo Warbixinta Baarista Sanadlaha ah ee U-hoggaansanaanta Sharciga, taas oo Xafiiska Hantidhowrka Guud JFS ku sameeyay labo iyo labaatan (**22**) hay'adood oo ka mid ah hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, sannad-maaliyadeedka dhammaaday 31da December 2025.

Hantidhowrka Guud waxa uu Baaristan sameeyey isaga oo fulinaya habraacyada qiimeynta khataraha (**Risk assessment procedures**) ee ku cad Qorshaha Guud ee Baarista Sanadlaha ah (**AOAP**[1]) **ee sanadka 2026**, kaas oo Xafiisku u adeegsado doorashada muunadda hay'adaha iyo walxaha la baarayo si uu u xaqiijiyo in hantidhowristu diiradda saarto meelaha ugu muhiimsan ee khataraha saamaynta ku leh maamulka hantida iyo maaliyadda dowladda, fulinta Baaristani waxa ay ku saleysan tahay Sharciyada Iibka Qaranka, **Lr. 22 ee 2016**, Maareynta Maaliyadda Guud, **Lr. 17 ee 2019**, Hantidhowrka Guud ee JFS, **Lr. 14 ee 2023** iyo heerka Caalamiga ah ee hay'adaha Sare ee Hantidhowrista (ISSAIs[2])

Warbixintan U-hoggaansanaanta Sharciga waxa ay muujinaysaa wixii khaladaad iyo cillado ah ee la xiriira u-hoggaansanaanta sharciga (**Compliance**) kuwaas oo laga helay hay'adaha la baaray, khaladadaka iyo cilladaha ay muujisay Baarista ayaa isugu jira dhinacyada maamulka iibka iyo qandaraasyada, maamulka hantida dowladda, uruurinta iyo maareynta dakhliga, nidaamyada xakamaynta, ilaalinta iyo maamulka gudaha hay'adaha dowladda, hubinta iyo diiwaangelinta soo dejiyeyaasha dawooyinka iyo qalabka caafimaadka iyo habraacyada hubinta tayada badeecooyinka, Sidoo kale, Baaristan waxa aan ku sameynay habraacyada maamulka shaqaalaha iyo maamulka hantida deeqaha.

Si waafaqsan **Qodobbada 5aad** iyo **9aad** ee **Sharci Lr. 14, 2023**, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waxa uu sannadkan soo saaray talo-bixin hantidhowriseed oo aad muhiim ugu ah hagaajinta maamulka hantida guud ee dowadda, xoojinta maareynta maaliyadda, iyo horumarinta isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda.

---

1 Annual Overall Audit Plan
2 International Standards of Supreme Audit Institutions

Heerka fulinta dabagalka talo-bixinnta Hantidhowriseed ee sannadka 2025 waxa uu muujiyey natiijo iyo horumar wanaagsan oo Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS ka gaaray xoojinta dabagalka iyo hirgelinta talo-bixinnada Hantidhowrka (**audit recommendations follow up**). Natiijada dabagalka waxa ay muujisay in **54%** talo-bixinnada loo fuliyey si dhammaystiran, **27%** la fuliyey qayb ahaan, halka **19%** aan weli la fulin, sida ku faahfaahsan Jaan-tuska Lr: (**1aad**)  heerkan sare ee fulinta talada hantidhowriseed. Heerkan fulineed waxa uu ka tarjumayaa dadaalka ay hay'adaha dowladda ku bixiyeen hirgelinta talo-bixinnada Hantidhowrka, iyo koboca fahamkooda ku aaddan ujeeddada fulinta baarista sanadlaha ah ee Hantidhowrka.

Kulamo shaqo oo guddiyada kala-geddisan ee Baarlamanaka Federaalku la yeeshay hay'adaha dowladda federaalka qaarkood ayaa kaalin waxtar leh ka qaatay kor u kaca fulinta talada hantidhowriseed ee Xafiisku soosaaray sanadkii 2025, sidaas darteed waxa aan bogaadinaynaa doorka Baarlamaanka Federaalka ee xoojinta isla-xisaabtan, taas oo gacan ka geysatay in hay'adaha dowladdu ay si wax ku ool ah u u aqbalaan dabagalka talooyinka ayna jadwallada howlahooda maalinlaha ah ku daraan fulinta talooyinka.

Waxa aan Madaxweynaha Jamhuuriyadda, Ra'isalwasaaraha Xukuumadda iyo Guddoonka Baarlamaanka Federaalka uga mahadcelinayaa taladooda iyo taageeradooda wax-ku oolka ah ee ku aaddan shaqada xafiiska Hantidowrka Guud, waxa kale oo aan madaxda hay'adaha dowladda ee ka qaybgalay Baarista U-hoggaansanaanta sharciga ee 2025 iyo dhammaan hawl-wadeennada hay'adahaas uga mahadcelinayaa wadashaqeyntii wanaagsanayd ee ay u fidiyeen fulinta baaristan.

Ugu dambeyn, waxa aan si gaar ah ugu mahadcelinayaa Hantidhowrayaasha, howl-wadeenka iyo shaqaalaha taageerada ee Xafiiska Hantidhowrka Guud, kuwaas oo dhammaantood si loo xaqiijiyo fulinta baaris madax-bannaan, tayo leh islamarkaana qiime ku kordhisa hay'adaha la baaray, horseedda horumarinta nidaamka maamulka iyo is-la-xisaabtanka dowladda u bixiyey qiime sare.

Guuleysta Goor & Ayaan,

**M.ne Axmed Ciise Guutaale**
**Hantidhowraha Guud, JFS**

**OG:** Ra'iisul Wasaaraha XFS,
Madaxweynaha JFS,

# FARRIINTA HANTIDHOWRAHA GUUD JFS



Adeegyada hantidhowrka iyo soo saarista Warbixinnadiisa sanadlaha ah waxa ay aad muhiim ugu yihiin korjoogteynta iyo Qiimeynta Natiijooyinka ka soo baxa Maamulka iyo Maareynta Khayraadka Guud ee dowladda, waxa kale oo ay Warbixinnada Hantidowrku xog qiime leh ka bixinayaan ilaa heerka aan dal iyo dowlad ahaanba xaqiijineyno gaarista yoolasheenna horumarineed iyo ujeeddooyinkeena bixinta adeegyo ku habboon Muwaadinka.

Sidaas awgeed Adeegyada hantidhowrka iyo soo saarista Warbixinnada Maaliyadda, heerka u hoggaansanaanta sharciga iyo Qiimeynta Waxqabadku waxa ay xoojinayaan Mabaadiida Isla-xisaabtanka iyo Gudashada Mas'uuliyadda Guud ee la xariirta sida loo kharash-gareeyey dakhliga iyo deeqaha dowladda.

Muddo 8 sano ah **2019 - 2025**, xogta dabagalka talo-bixinta Hantidhowrka Guud waxa ay muujisay isbeddel waxtar leh oo la xiriira heerka fulinta talooyinka Hantidhowrka, tusaale Sannadkii 2019, talo-bixinta Xafiiska Hantidhowrka Guud ee ay hay'adaha dowladda si dhammaystiran u fuliyeen waxa ay ahad **6%** oo keliya. Sannadkii 2020, heerka fulintu waxa ay gaartay **24%**, halka sannadkii 2021 ay kor u kacday **34%**. Sannadkii 2022, heerka fulintu waxa uu hoos u dhacday **13%**, taas oo muujinaysay caqabado ka jiray hirgelinta talo-bixinnada Hantidhowrka.

Hoos u dhacaas awgiis, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waxa uu xoojiyey dadaallada dabagalka iyo wacyigelinta ku aaddan muhiimadda fulinta talo-bixinnada Hantidhowrka. Natiijada dadaalladaas, sannadkii 2023 heerka fulintu waxa ay mar kale kor u kacday **35%**, halka sannadkii 2024 uu ahaa **30%**. Warka farxadda leh ayaa ah in sannadkii 2025, heerka fulinta talo-bixinta Hantidhowrku ay gaartay **54%**, taas oo ka dhigan heerkii ugu sarreeyey ee fulinta talo-bixinnada ee la gaaro muddadaas.

Kororkani waxa uu ka tarjumayaa xoojinta dabagalka talo-bixinta Baarista, wacyigelinta hay'adaha dowladda, hagaajinta xiriirka shaqo ee u dhexeeya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS iyo hay'adaha ka qeybgalay baarista sannadlaha ah iyo fahamka hay'adaha dowladda ee ku aaddan muhiimadda hirgelinta talo-bixinnada Hantidhowrka.


# Dabagalka Talo-bixinta Hantidhowrka Guud

Si waafaqsan Qodobbada **9aad** iyo **11aad** ee Sharciga Hantidhowrka iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waxa uu sameeyey dabagal lagu qiimeynayo heerka fulinta talo-bixinnada Hantidhowrka ee uu Xafiisku bixiyay sannadka 2025. Dabagalkaas waxa uu diiradda saaray qiimeynta heerka ay hay'adaha dowladda uga jawaabeen talo-bixinnadii hantidhowriseed ee ku soo baxay warbixintaas.

Natiijada dabagalkaas ayaa muujisay in wadarta guud ee  talo-bixinta Xafiiska Hantidhowrka guud ay ahayd **98 talo-bixin**, kuwaas oo hay'adaha dowladdu u kala fuliyeen sida ku faahfaahsan xagga hoose.

## Jaantuska Heerka Fulinta  talo-bixinta Hantidhowrka Guud ee BUSH ee 2025

**Jaantuska 1aad**




Fulinta talo-bixinta Baarista U-hoggaansanaanta Sharcigu waxa ay muhiim u tahay horumarinta wax-qabadka hay'adaha dowladda, yareynta khataraha jira (**Risk Mitigation**), iyo xoojinta nidaamka maamul-wanaagga. Sidoo kale,  fulinta talo-bixinnada Hantidhowrku waxa ay  hay'adaha dowladda ku caawiyaan xal u helidda caqabadaha jira, hagaajiyaan habsami u socodka hawlaha isla markaana ay xaqiijiyaan u-hoggaansanaanta sharciyada iyo xeerarka dalka.

Iyada oo laga duulayo muhiimadda fulinta talooyinka Hantidhowrka Guud ee JFS waxa uu sii wadayaa xaqiijinta waajibaadkiisa la xiriira bixinta iyo dabagalka  talada Hantidhowrka, isaga oo ilaalinaya mabaadi'da maamul-wanaagga iyo isla-xisaabtanka.

Sidaas darteed, Hantidhowrka Guud waxa uu dhammaan hay'adaha dowladda ku dhiirrigelinayaa in ay si  dhammaystiran u fuliyaan guud ahaan talooyinka ku lifaaqan warbixinnada sanadlaha ah ee Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS, si loo xoojiyo hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo tayada adeegyada dowladeed.

# Hay'adaha Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga Maray

| Hay'adaha Maamulka | |
|---|---|
| 1. | Golaha Shacabka |
| 2. | Golaha Aqalka Sare |
| 3. | Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha |
| 4. | Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga |
| 5. | Wasaaradda Maaliyadda |
| 6. | Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha |
| 7. | Hay'adda Istaatistikada Qaranka |
| 8. | Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta |
| 9. | Wasaaradda Diinta, Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka |
| **Hay'adaha Adeegga Difaaca iyo Amniga** | |
| 10. | Wasaaradda Gaashaandhigga |
| 11. | Ciidanka Booliska Soomaaliyeed |
| 12. | Hay'adda Nabad-sugidda iyo Sirdoonka Qaranka |
| **Hay'adaha Dhaqaalaha** | |
| 13. | Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha |
| 14. | Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka |
| 15. | Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa |
| 16. | Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska |
| 17. | Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Dib-u-dhiska |
| 18. | Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada |
| 19. | Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha |
| 20. | Hay'adda Tayo-dhowrka Soomaaliyeed |
| 21. | Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada |
| **Hay'adaha Arrimaha Bulshada** | |
| 22. | Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegga Aadanaha |

# DULMAR GUUD

Si waafaqsan Sharciga Hantidhowrka Guud iyo Qorshaha Fulinta Baarista sanadlaha ah ee Hantidhowrka, Xafiiska Hantidhowrka Guud  waxa uu xiriirro wadashaqeyneed oo hufan la sameeyay maamulka hay'adaha ka qaybgalay baarista sanadka 2025, si uu fursad ugu siiyo hay'adaha in ay saxaan natiijada khaladaadka ku soo baxay baarista, Qayb ka mid ah xiriirradan hantihdowrku waxa uu ku muujiyay warqadaha maamulka (management letters) iyo weydiimo Xafiisku la wadaagay intii baaristu socotay (audit queries) dhammaan maamulka hay'adaha sanadkan lagu sameeyay Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga (BUSH).

Baaristani waxa ay diiradda saartay heerka U-hoggaansannaanta Sharciga , Xeerarka, Xeer-nidaamiyeyaasha iyo Habraacyada walxaha la baaray (**subject matters**) oo ay ugu muhiimsan yihiin:

- Hannaanka Iibka, Agabka iyo Adeegyada.
- Hannaanka Maamulka Shaqaalaha Dowladda.
- Hubinta Jiritaanka iyo Shaqada Baaraha Gudaha.
- Hubinta Habraacyada Xakamaynta Hay'adaha Dowladda.

Natiijada iyo khaladaadka ay warbixintani soo bandhigtay oo keli ah waa waxyaabihii aan xalka loo helin intii baaristu socotay, waxa ayna ka kooban tahay:

- Khaladaadka ugu waaweyn ee baalmarsan, shuruucda, xeerarka, xeer-nidaamiyeyaasha iyo habraacyada.
- Talo-bixinta baarista oo aan ugu talo-galay si wax looga qabto khaladaadka lagu ogaaday Baarista U-Hoggaansanaanta Sharciga.

## 1. HANNAANKA IIBKA AGABKA IYO ADEEGGA

### Khaladaadka

**U-hoggaansanaan  La'aanta Habraaca Magacabista Guddiga & Diyaarinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Qandaraaska Iibka**

**Konton iyo Sagaal boqolkiiba (59%)** hay'adaha dowladda ee maray baarista BUSH ma aysan u hogaansamin habraacyada sharci ee la xiriira magacaabista guddiga qandaraasyada iibka iyo diyaarinta qorshaha iibka sannadalaha ah, iyaga oo fuliyay iib wadartiisu dhan tahay **US $18,554,459.67**, tani oo baalmarsan Qodobbada $27^{aad}$ (1,2,3 & 4) iyo $58^{aad}$ (1 & 2) ee Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka, Lr. 22, 2016.

**Hubinta Iyo Xaqiijinta U-hoggaansan la'aanta Xulashada Adeeg-Bixiyayaasha iyo La-Taliyayaasha**

**Konton iyo saddex boqolkiiba (53%)** hay'adaha  aan ku sameeyay xaqiijinta iyo hubinta u-hogaansanaanta sharci ee xulashada adee-bixiyayaasha iyo la-taliyayaasha ayaan u hogaansamin habraacyada sharci, tani oo baalmarsan Qodobbada $31^{aad}$(1 & 9), $69^{aad}$(1 & 3) iyo $94^{aad}$(1) ee  Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka Lr. 22 ee 2016. Qodobka $14^{aad}$(3) ee Wax ka Beddelka Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka . Qodobka $2^{aad}$(3) ee Xeer-Nidaamiyaha Ra'iisul Wasaaraha ee Xeer Lr.138.

### Talo-bixin

Si waafaqsan Qodobbada 27[aad](1,2,3 & 4), 31[aad](1 & 9), 58[aad](1 & 2), 69[aad](1 & 3) iyo 94[aad](1) ee Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka , Lr. 22, 2016, Qodobka 14[aad](3) ee Wax ka bedelka Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka , Qodobka 2[aad](3) ee Xeer-Nidaamiyaha Ra'iisul Wasaaraha, Xeer Lr.138;

- Waa in dhammaan hay'adaha dowladda ee laga helay khaladaadka la xiriira guddiga iibka qandaraasyada iyo qorshaha iibka sannadalaha ah u hogaansamaan habraacyada sharci islamarkaana u magacaabaan una diyaariyaan qorshaha iibka sannadlaha ah.

- Waa in dhammaan hay'adaha dowladda ee laga helay khaladaadka u hogaansan la'aanta habraacyada xaqiijinta ama hubinta xulashada adeeg-bixiyayaasha iyo la-taliyayaashu ay u hogaasamaan habraacyada sharci ee ku xusan qodobbada kore, tani oo xoojinaysa daah-furnaanta iyo tartanka furan sidoo kale-na dhiirigelinaysa in si siman loogu tartamo dhammaan fursadaha.

## 2. MAAMULKA HANTIDA DOWLADDA

### Khaladaadka

**U-hoggaansan La'aanta Hannaanka Maareynta Hantida Dowladda & Heshiisyada Dheef-wadaagga ah**

Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada ayaa qandaraasyo heshiis la gashay Toban (10) shirkadood oo gaar loo leeyahay iyada oo aan si dhamaystiran loo marsiin habraacyada qandaraasyada tartanka furan islamarkaana aysan Guddiga Isku Dhafka Wasaaradeed ee (IMCC) aysan ansixin heshiisyadaasi. Intaasi waxaa dheer, in Shan (5) shirkadood oo ka mid ah Toban-ka (10) shirkadood aysan waligood cashuur bixin halka hal (1) shirkad oo ka mid ah shirkadahaasi ay ka dhacsanayd shahadada cashuur bixinta. Hadaba, baaristu waxa aan ku ogaaday in Wasaaraddu aysan kaydin diiwaanka hantida & heshiisyda kirada ee ku suntan magaca Wasaaradda lana samayn kormeer joogto ah oo lagu xaqiijinayo xaaladda hantida.

**Maqnaanshaha Nidaamka Diiwaangelinta Gaadiidka Dowladda**

Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ee sannad maaliyadeedka dhammaaday ee 2025, waxa aan ku ogaaday in maamulka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada aysan hirgelin nidaam lagu maareeyo diiwaangelinta gaadiidka dowladda islamarkaana ay wali ku tiirsan tahay buug gacan-qoraal ah iyada oo kaydka xogtu yahay mid hooseysa oo aan dhamaystirnayn.

**U-hoggaansanaan La'aanta Habraaca Diiwaangelinta Gaadiidka Dowladda**

Baarista U- hoggaansanaanta Sharciga ee sannad maaliyadeedka dhammaaday ee 2025, waxa aan ku ogaaday in Wasaaraddu diiwaangelisay Boqol iyo afar (104) gaadiid dowladeed ah iyada oo boqol (100) ka mid ahi ay ka maqnaayeen dukumentiyada muhiimka u ah ee xaqiijinaya caddeynta milkiyadda sida warqadaha iibsiga iyo dukumentiyada kale ee khuseeya.

**U-hoggaansanaan La'aanta Habraaca Bixinta Taargada Gaadiidka Dowladda**

Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ee sannad maaliyadeedka dhammaaday ee 2025, waxa aan ku ogaaday in Wasaaraddu bixisay sagaal (9) taargo iyada oo aan loo hogaansamin habraaca bixinta taargada gaadiidka dowladda sida in aan la diiwaangelin magaca, nooca, midabka iyo xogta wakiilka

hay'adda ee gaariga ku qoran.

**Diiwaanka Hantida Deeqaha oo aan La Cusboonaysiin, Laguna Diiwaangelin Nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliya ee SFMIS.**

Waxa aan ku ogaaday baarista BUSH ee Sanad Maaliyadeedka dhammaaday ee 2025 in Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed aysan si joogto ah u cusboonaysiin hantida laga helay deeq bixiyayaasha iyo agabka kale ee hay'adda islamarkaana aan lagu diiwaangelin nidaamka SFMIS-ka.

## Talo-bixin

Si waafaqsan Qodobbada 3aad(5), 6aad(5), 8aad(2 & 4) iyo 12aad(2) ee Xeer-nidaamiyaha Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowlada, Xeer Lr. 137 ee 2023 iyo Qodobka 17aad(1) Hagaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowlada, ee Qaraarka Xoojinta U-hoggaansanaanta Sharciyada iyo Xeerarka Dakhliga, Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 138, Qodobka 7aad ee Xeer-nidaamiyaha Sharciga Shirkadaha, Sharci Lr 18 ee 2019, Qodobada 2(1,2&3) & 11(1, 2&7) ee Hab-raaca diiwaan-gelinta iyo sugidda milkiyadda gaadiidka dhulka Lr.154 ee 2024:

- Waa in Maamulka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada ay u hogaansanto habraacyada gelidda qandaraasyada si kor loogu qaado daah-furnaanta, waana in qandaraas kasta la marsiiyo guddiga isku dhafka wasaaradeed si waafaqsan sharciga.
- Waa in Maamulka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawadu hubiyaa in dhammaan shirkadaha lala galayo heshiisyada ay leeyihiin shati ganacsi oo sax ah iyo shahaadada cashuur-bixinta, inta lagu guda jiro Sannad Maaliyadeedka 2026.
- Waa in Maamulka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawadu cusboonaysiiyo diiwaanka hantida iyo heshiisyada kirada ee ku suntan magaca hay'adda si kor loogu qaado xaqiijinta xaaladda hantida.
- Waa in Maamulka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada uu hirgeliyo nidaam lagu maareeyo diiwaangelinta gaadiidka dowladda islamarkaana waa in la casriyeeyo nidaamka kaydka xogta gaadiidka. Sidoo kale, maamulku waa in uu xaqiijiyaa caddeynta milkiyadda gaadiidka sida warqadaha iibsiga iyo dukumetiyada kale. Ugu dambayn, Maamulka Wasaaradda waxa aan usoo jeedinayaa in la dhamaystiro habraaca kaydka xogta ee bixinta taargada gaadiidka iyada oo la diiwaangelinayo dhammaan xogaha lagama maarmaanka ah sida ku xusan habraaca diiwaangelinta iyo sugidda milkiyadda gaadiidka dhulka.
- Waa in Maamulka Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ay si joogto ah u cusboonaysiiyaan hantida lagu helo deeqaha islamarkaana lagu diiwangeliyo SFMIS-ka si kor loogu qaado diiwaanka iyo ilaalinta hantida dadweynaha.

# 3. HANNAANKA MAAMULKA SHAQAALAHA

## Khaladaadka

**U-Hoggaansanaan La'aanta Habraaca Dhisidda Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa si waafaqsan Sharciga Lr. 11 ee 2006**

**Afartan iyo Lix boqolkiiba (46%)** hay'adaha maray BUSH ayaan dhisin guddiga anshax-marinta iyo dallacsiinta hay'adaha dowladda oo muhiim ah hannaanka isla-xisaabtanka iyo daah-furnaanta hay'adda,

taasi oo qaarkood aysan dhisin guddiga goob shaqo oo muhiim u ah matalaadda shaqaalaha isla-markaana xubno ka ah guddiga.

**U-hoggaansanaan La'aanta Hannaanka Maareynta Fasaxyada**

**Labaatan boqolkiiba (20%)** hay'adaha baarista aan ku sameeyay aysan u hogaansamin habraacyada maareynta fasaxyada shaqaalaha dowladda sida fasaxyada caafimaadka, waxbarashada iyo dhalmada.

**U-hoggaansanaan La'aanta Habraacyada Howlgelinta Shaqaalaha Diblomaasiyiinta Dibadda**

Baarista BUSH ayaa muujisay in Wasaaradda Arrimaha Dibaddu ay hawl-gelisay Afar iyo toban (14) diblomaasiyiin ka hawl-gala dibadda iyada oo aan si dhamaystiran loogu hogaansamin habraacyada sharcigu jideeyay sida in ay ka hawl-galaan xarunta Wasaaradda ugu yaraan muddo labo (2) sanno ah. Sidoo kale, waxa aan ku ogaaday baarista in Sagaal iyo toban (19) shaqaale oo laga hawl-geliyay shaqo dibadeed aysan qaadan tababarka shaqada dibloomasiyadda oo muhiim u ah kobcinta xirfadda iyo wanaajinta matalaadda dalka.

## Talo-bixin

Si waafaqsan Qodobbada 33$^{aad}$(1), 34$^{aad}$(1), 35$^{aad}$(1)(b) & (2) , 37$^{aad}$(2, 3, 4 & 5), 38$^{aad}$(1, 2, 3 & 4) ee Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda, Sharci Lr. 11, 2006, Qodobbada 2aad iyo 3 ee Habraaca Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa

- Waa in dhammaan hay'adaha dowladda ee baaristu muujisay in aysan u hogaansamin habraaca Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa ay dhisaan guddigaasi si waafaqsan qodobada sharci ee ku xusan Sharciga Shaqaalaha Rayidka iyo habraacyada Guddiyada Anshaxa, Abaalmarinta, Dallacaadaha iyo Goob-shaqo, waana in la dhiso Guddiga Goob-shaqo ee hay'adda kuwaasi oo xubno ka ah guddiga Anshax-marinta iyo dallacaadaha ee hay'adda.

- Waa in dhammaan hay'adaha dowladda ee baaristu muujisay in aysan si sharciga waafaqsan u maareyn fasaxyada, una hogaansamaan habraacyada bixinta fasaxyada ee shaqaalaha lana kaydiyo dhammaan dukumentiyada ku lifaaqan codsiga fasaxyada.

- Waa in Maamulka Wasaaradda Arrimaha Dibaddu u hogaansamaan habraacyada hawl-gelinta dibloomaasiyiinta ka hawlgala dibadda, iyaga oo ugu yaraan labo (2) sanno ka hawl-galaya Xarunta Wasaaradda. Sidoo kale, waa in kor loo qaado xirfadooda shaqo sida in la siiyo tababarka shaqada dibloomasiyadda dibadda ka hor inta aan la hawl-gelin.

# 4. HUBINTA NIDAAMYADA XAKAMAYNTA HAY'ADAHA DOWLADDA

## Khaladaadka

**Hirgelin la'aanta Siyaasaddaha Maamulka Masaajidda iyo Dugsiyada Diiniga**

Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka oo aan ku sameeyay baarista BUSH ayaan ku ogaaday in Maamulka Wasaaraddu uusan dejin islamarkaana uusan hirgelin siyaasadaha maamulka masaajidda iyo dugsiyada diinta oo lagama maarmaan u ah aasaaska bulshada.

**Hirgelin la'aanta Guddiga Waqafka iyo Diiwaangelin La'aanta Hantida Waqafka**

Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka oo aan ku sameeyay baarista BUSH ayaan ku ogaaday in aan la dhisin guddiga wafaqka lana diiwaangelin hantida la waqafo, tani oo baalmarsa Qodobbada 1$^{aad}$

& $3^{aad}$ ee Xeer-nidaamiyaha Waqafka, Xeer Lr. 119 ee 1973 iyo Qodobka $26^{aad}$ (1 & 3) ee Xeer-Nidaamiya Sharciga Nidaamka Xukuumadda, Xeer Lr. 174 ee 2025.

**Maqnaanshaha Guddiga Diiwaangelinta, Kormeerka Daawooyinka iyo Qalabka Caafimaadka**

Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga waxa aan ku ogaaday in Wasaaradda Caafimaadka aysan dhisin Guddiga Diiwaangelinta, Kormeerka Dawooyinka iyo Qalabka Caafimaadka islamarkaana aysan hirgelin nidaamka diiwaangelinta soo-dejiyayaasha dawooyinka iyo qalabka caafimaad kuwaasi oo ahmiyad wayn u leh caafimaadka bulshada Soomaaliyeed.

**Jiritaan La'aanta Xafiiska Kaydka Diiwaanka Dembiyada**

Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ee Sannad Maaliyadeedka dhammaaday ee 2025, waxa aan ku ogaaday in Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed aysan samayn Xafiika kaydka dambiyada islamarkaana uusan jirin nidaam dhamaystiran oo diiwaangelineed kaasi oo kaydiya xogaha cadeynta dembiga oo muhiim u ah amniga, cadaaladda, dowlad-wanaagga iyo tixraaca xogaha dadweynaha.

**Hubinta Hawlgelinta iyo Shaqada Baaraha Gudaha**

**Konton boqolkiiba (50%)** hay'adaha dowladda ee aan ku sameeyay BUSH ayaan hawl-gelin baaraha gudaha ama aan u hogaansamin habraaca dhisidda iyo shaqada baaraha gudaha oo muhiim u ah hufnaanta maamulka hay'adaha dowladda.

## Talo-bixin

Si waafaqsan Qodobbada $1^{aad}$ & $3^{aad}$ ee Xeer-nidaamiyaha Waqafka, Xeer Lr. 119 ee 1973 iyo Qodobka $26^{aad}$ (1 & 3) ee Xeer-Nidaamiya Sharciga Nidaamka Xukuumadda, Xeer Lr. 174 ee 2025, Qodobbada $33^{aad}$(2) (g), $109^{aad}$ & $110^{aad}$, Qodobbada $116^{aad}$(2) & $117^{aad}$(2) ee Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka, Sharci Lr. 22 ee 2016, Qodobbada $3^{aad}$ & $4^{aad}$ ee Sharciga Soo Dejinta Dawooyinka iyo Qalabka Caafimaadka, Sharci Lr. 9 ee 1989, Qodobka $260^{aad}$(1) ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Qodobka $46^{aad}$(1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Sharci Lr.17 ee 2019:

- Waa in Maamulka Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka uu hirgeliyo siyaasado lagu maamulo masaajidda iyo dugsiyada diinta si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha Waqafka.

- Waa in Maamulka Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka uu hirgeliyo islamarkaana dhiso Guddiga Waqafka lana diiwaangeliyo hantida la waqfo, inta lagu guda jiro Sannad Maaliyadeedka 2026.

- Waa in Wasaaradda Caafimaadku ay dhistaa guddiga diiwaangelinta, Kormeerka Dawooyinka iyo Qalabka Caafimaadka islamarkaana ay hirgeliso nidaamka diiwaangelinta soo-dejiyayaasha dawooyinka iyo qalabka caafimaad si waafaqsan Sharciga Soo Dejinta Dawooyinka iyo Qalabka Caafimaadka, Sharci Lr. 9 ee 1989.

- Waa in Maamulka Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed uu sameeyo Xafiiska Kaydka Dembiyada islamarkaana uu si dhamaystiran u diiwaangeliyo dhammaan xogaha dambiyada kuwaasi oo muhiim u ah amniga, cadaaladda, dowlad-wanaagga iyo tixraaca xogaha dadweynaha.

- Waa in Maamulka hay'adaha laga helay khaladaadka u hoggaansan la'aanta habraaca dhisidda iyo shaqada baaraha gudaha ay hawl-geliyaan baaraha gudaha islamarkaana diyaariyaan habraacyada shaqo ee kor loogu qaadayo isla-xisaabtanka iyo tayaynta hubinada gudaha.

# HORDHAC

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waa hay'ad dastuuri ah, madax-bannaan oo heer federaal ah si waafaqsan Qodobka 117[aad] ee Dastuurka JFS, sidaas oo kale waa hay'adda ugu sarreysa ee ka mas'uulka ah dhowrista, baarista iyo kawarbixinta hantida dowladda sida ku cad Qodobka 4[aad] ee Sharci Lr. 14, 2023.

XHG waxa uu fuliyaa mabaadi'da dowlad-wanaagga, hufnaanta, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ku saleysan ka hortagga lunsiga hantida dowladda, waxa uuna sameeyaa hantidhowris madax-bannaan oo sanadle ah si waafaqsan Sharci Lr. 17, 2019 iyo Sharci Lr.14, 2023, Xafiiska Hantidhowrka Guud marka uu gudanayo hawlihiisa hantidhowriseed waa ka madax-bannaan yahay dhammaan laamaha dowladda, mana jiro amar ama kor-joogteyn uu ku leeyahay qof ama maamul kale, waxa uuna u-hoggaansamaa Dastuurka iyo shuruucda kale ee Jamhuuriyadda oo keli ah.

Iyada oo laga duulayo waajibaadkaas, Xafiisku waxa uu fuliyey Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga (**BUSH**) ee sanad-maaliyadeedka dhammaaday **2025**, taas oo ku saleeysan Qorshaha Guud ee Baarista Sannadlaha (**AOAP**) ee 2026.

Qorshahan waxa uu ku dhisan yahay qiimeynta khataraha (**risk-based approach**), si loo hubiyo in baaristu diiradda saarto meelaha ugu muhiimsan ee saameynta ku leh maareynta hantida dowladda iyo adeegyada bulshada.

Baaristan waxaa la fuliyay iyada oo la raacayo Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare (**ISSAIs**), gaar ahaan kuwa la xiriira Baarista U-Hoggaansanaanta Sharciga lana waafajiyay Sharciyada Hantidhowrka Guud, Maareynta Maaliyadda Dowladda, iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah. Xulashada hay'adaha baarista aan ku sameeyay waxa aan ku saleyeenay hannaanka qiimeynta khataraha (**risk-based assessment**), iyada oo aan tixgelin siiyay muhiimadda hay'adahaasi u leeyihiin hawlaha Dowladda Federaalka Soomaaliya (**DFS**), qoondada miisaaniyadeed, kaalinta ay ku leeyihiin dhaqaalaha, dakhliga, maamulka iyo heerkooda u-hoggaansanaanta sharcgiga, siyaasadaha iyo habraacyada maamulka kheyraadka dowladda.

# WALXAHA LA BAARAY

Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ee sanad-maaliyadeedka 2025 waxaa la fuliyay iyada oo dii-radda la saarayo afar (4) mowduuc oo muhiim ah, kuwaas oo laga dhiraandhiriyey **17** walxo baariseed (**17 subject matters**), waxa ayna kala ahaayeen:

1) **Hannaanka Maamulka Shaqaalaha**
    - Fasaxyada shaqaalaha
    - Dallacaadda iyo anshaxa
    - Howlgelinta diblomaasiyiinta dibadda
2) **Hannaanka Iibka Agabka iyo adeegyada**
    - Dhismaha guddiyada Iibka iyo qorsheynta iibka
    - U-qalmidda qandaraas helidda
    - Hannaanka Iibka Hubka
3) **Maamulka Hantida Dowladda**
    - Maareynta hantida lagu helay deeqaha
    - Habraacyada heshiisyada kirada iyo dheef-wadaagga
    - Habraacyada diiwaangelinta gaadiidka dowladda (GD)
4) **Hubinta Habraacyada Xakamaynta Hay'adaha Dowladda**
    - Dhisidda & hubinta diiwaanka dambiyada
    - Habraacyada bixinta shahaadooyinka dambila'aanta
    - Nidaamyada bixinta shahaada soo dhoofsiga & ganaxa ee U-hoggaansanaanla'aanta habraacyada tayodhowrka
    - Diiwaangelinta iyo korjoogtaynta soo dejinta iyo soo dejiyaasha agabka caafimaadka
    - Maamulka masaajiddda iyo dugsiyada diiniga ah
    - Dhisidda guddiga waqafka iyo diiwaangelinta hantida la waqfay.
    - Hubinta jiritaanka iyo shaqada baaraha gudaha.

# HALBEEGYADA BAARISTA LOO ISTICMAALAY

- Sharci Lr. 14, 2023
- Sharci Lr. 17, 2019
- Sharci Lr. 22, 2016
- Sharci Lr. 20, 2020
- Sharci Lr. 11, 2006
- Sharci Lr. 112, 2013
- Sharci Lr. 9, 1989
- Sharci Lr 5, 1965
- Xeer Lr. 137, 2023
- Sharci Lr. 154, 2024
- Xeer Lr. 142, 2023
- Xeer Lr. 119, 1973
- Xeer Lr 21,1973
- Xeer Lr. 174, 2025
- Xeer Lr. 161, 2024
- Xeer Lr. 163, 2024

# UJEEDDOOYINKA IYO BAAXADDA BAARISTA

Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga waa hirgelinta hantidhowris iyo qiimeyn madax-bannaan, taas oo xaqiijineysa ujeeddooyinka soo socda:

- Hubinta heerka ay hay'adaha dowladda ee ay quseyso baaristu ugu hoggaansan yihiin shuruucda. , habraacyada iyo heerarka Caalamiga ah ee Hantidhowrista Caalamiga ah oo ay Soomaaliya aqoonsan tahay, iyada oo la tixraacayo walxaha la baaray (**subject matters**) ee sannad maaliyadeedka ku dhammaaday 31da December 2025;
- Hubinta in hannaanka maamulka iibka, agabka iyo adeegyada uu yahay mid u hoggaansan habraacyada sharciga;
- Qiimeynta hannaanka maamulka shaqaalaha oo ay ku jiraan abaalmarinta, dallacaadda iyo fasaxyada,
- Xaqiijinta in hantida dowladda loo maareeyay si hufan, iyo
- Hubinta in habraacyada xakamaynta dowladda ay u shaqaynayaan sidii loogu talagalay.

# GUNAANAD

Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga (**BUSH**) ee sannad-maaliyadeedka 2025, oo la fuliyey 2026, kuna saleysan Qorshaha Sannadlaha ah ee Baarista (**AOAP 2026**), waxa ay bixisay Talo-bixinno ku saabsan heerka U-hoggaansanaanta hay'adaha dowladda ee shuruucda, habraacyada iyo nidaamyada maamulka. Natiijooyinka baaristu waxay muujinayaan jiritaanka cillado la xiriira xakamaynta gudaha, habraacyada maamulka, iyo hirgelinta shuruucda, kuwaas oo u baahan in si nidaamsan wax looga qabto.

Dhanka kale, dadaallada joogtada ah ee Xafiiska Hantidhowrka Guud iyo dabagalka talooyinka ayaa horseeday horumar la taaban karo, gaar ahaan hagaajinta habraacyada shaqo, tayada dukumentiyada, iyo wacyiga hay'adaha dowladda ee ku aaddan waajibaadkooda sharci. Sidoo kale, hirgelinta talo-bixinnada hantidhowriseed ee la fuliyay ama qeyb-ahaan laga fuliyay uu gaaray **81%** tani oo muujinayaa isbeddel muuqda oo ku yimid hirgelinta talo-bixinta iyo xoojinta isla-xisaabtanka.

Baaristan waxa saldhig u ah mabda'a wax-ku-darka (**add value principle**), iyada oo diiradda la saaray arrimo istiraatiiji ah oo saameyn toos ah ku leh maamul-wanaagga iyo adeegyada dowladda.

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu bogaadinayaa wada-shaqeynta hay'adaha dowladda iyo kaalinta Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee dabagalka warbixinnada hantidhowrka, taas oo muhiim u ah xaqiijinta isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta.

Ugu dambeyn, XHG waxa uu adkeyneynayaa sii wadista hirgelinta talo-bixinta hantidhowriseed iyo xoojinta nidaamyada maamulka, kuwaas oo fure u ah horumarinta maamul-wanaagga, ilaalinta hantida qaranka, iyo kor u qaadidda kalsoonida dadweynaha.

**Axmed Ciise Guutaale**
**Hantidhowraha Guud, JFS**

30 June 2026



# XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA


Muqdisho, Soomaalyia

www.oag.gov.so | oag@oag.gov.so